## Waaxda Vermont ee Caruurta iyo Qoysaska (DCF) waxaa weeye hay'ada gobolka oo ka masuul ah ilaalinta caruurta iyo xoojinta qoysaska.

Waaxdeena Adeegyada Qoysku (FSD) waxay kala shaqaysaa qoysaska iyo dadka kale sidii loo xaqiijin lahaa in caruurta iyo dhalinyarta:

- Ay amaan uga noqon lahaayeen tacadiga
- Loo buuxin lahaa baahiyahooda aasaasiga ah (sida, cuntada, dharka, hoyga, iyo daryeelka caafimaadka)
- Ay u heli lahaayeen daryeelka, taageerada, iyo kormeerka waalidka ee ay ugu baahan yihiin badqabkooda iyo waxbarashadooda

## Maxay FSD ula xidhiidhay qoyskayga?

Waxay u badan tahay in uu nala soo hadlay qof ka warwarsan amaanka iyo badqabka ilmahaaga.

Ciddaa soo hadashay waxay noqon kartaa xubin qoys, saaxiib, jaar ama qof kale oo garanaya ilmahaaga.

Cid kasta ayaa nala soo hadli karta si ay noogu sheegto wax ay ka walaacyo. Dadka qaar, sida dhakhaatiirta, macalimiinta, iyo bixiyayaasha daryeelka ilmaha, ayuu sharcigu ku waajibinayaa inay ka warbixiyaan wixii tacadi ama dayacaad ilme ee ay ka shakiyaan.

**Waxa aanu taleefanadaas u naqaan *warbixino*.**

## Maxaa lagu sameeyaa warbixinaha laga helo qoyskayga?

### Kormeere:

1. Ayaa naqdiya warbixinta.
2. Ayaa eega waxyaabaha sida da'da ilmaha iyo nooca walaacyada la sheegey.
3. Ayaa go'aamiya in jawaab (waxka qabad) loo baahan yahay - isagoo ka duulaya sharciga Vermont iyo siyaasada FSD.
4. Ayaa doorta waxka qabadka munaasabka ah: qiimayn iyo baadhitaan.
   *Mararka qaar, sharcigu waxa uu nagu waajibinayaa in aanu samayno baadhitaan. Tan waxaa kamid ah wakhti kasta oo ay jiraan eedeyn ah in ilmaha uu kula kacay tacadi galmo qof wayni.*
5. Ayaa kugu qora hawlwadeen kiiseed.
   *Waxka qabadka la doortay waxa uu caadiyan ku bilaabmaa 72 saacadood gudahood. Waxay u badan tahay inay tahay wakhti aad ogaato in aanu hawsha qoyskaaga ku jirno.*

Hawlwadeenku ma sheegi karo haybta cidda bixisay warbixinta. Haybtooda ayaa la sheegi karaa hadii warbixintu timaaddo maxkamad ama dacwadda adeegyada bilaa aadanka.

## Sidee ayuu wax ka qabadku ku bilaabmaa?

### Baadhitaan:

1. Hawlwadeenka ayaa waraysan doona ama kormeeri doona ilmaha ku jira warbixinta. *Sharcigu waxa uu u ogol yahay in tan la sameeyo iyada oo aanad ogayn ama aanad bixin ogolaanshe hadii waaran lasoo saaro.*
2. Cid dhex dhexaad ah sida macalin ama kalkaalisada caafimaadka dugsiga ayaa joogi doona wakhtiga waraysiga.
3. Waxa aanu kaaga warami doonaa waraysiga iyo warbixinta marka ay sidaa u dhamaato.

### Qiimayn:

1. Hawlwadeen ayaa kula soo xidhiidhi doona si ay kaagala hadlaan walaacyada laga soo warbixiyay.
2. Waxa ay kaa dalban karaan ogolaanshahaaga inay la hadlaan ama komeeraan ilmaha ku jira warbixinta.
3. Hadii aad diido, waxa aanu weli go'aansan karnaa in aanu samayno baadhitaan hadii ay jiraan walaacyo amaan.

**Waa inaynu wada xidhiidhno!**
Noo sheeg:

- Qaabka ugu wanaagsan ee aanu kuula soo xidhiidhi karno (sida, cinwaan iimeel).
- Hadii ay is badasho xaaladda noloshaadu ama cinwaankaaga boostadu.

## Maxaa la samayn doonaa waxka qabadka?

Talaabooyinka soo socda ayaa la qaadi doonaa baadhitaanada iyo qiimaynta.

### Tallaabo 1: Qiimaynta amaanka ilmaha

Hawlwadeenka ayaa isticmaali doona *Agabka Qiimaynta Amaanka SDM®* si uu u:

a. Qiimeeyo amaanka markaa ee ilmahaaga.
b. Go'aamiyo hadii ilmahaagu uu yahay *amaan*, *amaan ku noqonayo qorshe*, ama *aanu amaan ahayn*.

### Tallaabo 2: Qiimaynta khatarta qoyska

Hawlwadeenka ayaa isticmaali doona *Agabka Qiimaynta Khatarta SDM®* si uu u:

a. Qiimeeyo khatarta waxyeelada mustaqbalka ee wax ka qabad aanu jirin.
b. Go'aamiyo heerka khatarta: *yar*, *dhexe*, *sare* ama *aad u saraysa*.

### Tallaabo 3: Go'aaminta natiijada

Hadii khatartu *sarayso* ama *aad u sarayso*, waxa aanu furi karnaa kiis adeegyada joogtada ah oo ka caawinaya qoyskaaga inay xooganaadaan.

Hadii aanu baadhitaan samaynayno, waxa aanu go'aamin doonaa hadii tacadiga ama dayacaada la sheegey uu dhacay. Hadii HAA ay tahay:

- Warbixinta waa la xaqiijiyay.
- Magaca qofka xaqiijiyay waxaa lagu dari karaa Duwaanka Dhawritaanka Ilmaha.

## Maxaa dhacaya intaa kadib?

Hadii aanu furno kiis adeegyada joogto ah, waxa aanu kaa caawin doonaa diyaarinta qorshe lagaga dhigayo gurigaaga amaan, lagu haynayo ilmahaaga guriga, oo lagu xoojinayo qoyskaaga.

Waxa kamid ah tan:

1. Qiimaynta xaalada ilmahaaga (sida, caafimaadka jidhka iyo maskaxda).
2. Ogaanshaha waxa uu qoyskaagu ku wanaagsan yahay iyo caqabadaha. Tan waxaa kamid ah mushkiladaha loo baahan yahay in wax laga qabto iyo waxa keena.
3. Dhismaha dalad qoys iyo asxaab ka kooban oo ku caawin kara.
4. Ogaanshaha adeegyada iyo taageerada caawin doona qoyskaaga. Tan waxaa kamid ah, tusaale ahaan, la-talin, fasalada waalidnimada, tobobarka shaqo, iyo daawaynta iyo kasoo kabashada balwadaha.

## Miyaad iga qaadanaysaan ilmahayga?

Jawaabtu mar kasta waa MAYA.

Hadii aanu u aragto in ilmahaagu aanu amaan ahayn, waxa aanu ka dalban doonaa maxkamada inay eegto xaalada. Xaakinka ayaa markaa gaadhaya go'aanka.

## Halkee wax badan ka ogaan karaa?

Booqo dcf.vermont.gov/fsd si aad:

- U barato shuruucda, siyaasadaha, iyo qawaaniinta lagu maamulo shaqadayada caruurta, dhalinyarta, iyo qoysaska.
- U hesho nuqul ah *Tilmaamta Waalidka ee Waaxda Adeegyada Qoyska DCF*.
- U hesho nuqulo ah daabacaadaha kale.

## Halkee ayaan ka heli karaa kaalmo kale?

Hawlwadeenkaaga ayaa kugu xidhi kara barnaamijyo caawin kara qoyskaaga.

Waxa aad sidoo kale heli kartaa kaalmo kuu gaar ah. Meel wanaagsan oo laga bilaabaa waa websaytka DCF. Tag dcf.vermont.gov si aad u hesho barnaamijyada kaa caawin kara:

- Buuxinta baahiyaha aasaasiga ah ee qoyskaaga (sida, daryeelka ilmaha, tamarta, cuntada, shidaalka, iyo biyaha).
- Xaqiijinta korniinka iyo badqabka caafimaadka qaba ee caruurtaada.
- Gaadhidda yoolasha kaa caawin kara inaad daryeesho qoyskaaga dhaqaale ahaan.

Waxa aad sidoo kale wax ka ogaan kartaa khayraadka kale ee aad heli karto adiga oo garaacaya 2-1-1 meel kasta oo aad ka joogto Vermont.

## XAFIISYADA DEGMADA

Barre: (802) 479-4260

Bennington: (802) 442-8138

Brattleboro: (802) 257-2888

Burlington: (802) 863-7370

Hartford: (802) 295-8840

Middlebury: (802) 388-4660

Morrisville: (802) 888-4576

Newport: (802) 334-6723

Rutland: (802) 786-5817

Springfield: (802) 289-0648


St. Albans: (802) 527-7741

St. Johnsbury: (802) 748-8374

**U SHEEG HAWLWADEENKAAGA:**

- **Luuqada aad sida ugu fiican ugu hadasho & u arkhrido.**
- **Hadii aad u baahan tahay adeegyada turjubaada oo bilaash ah si aad u xaqiijiso inaad fahanto waxa aynu is leenahay.**
- **Hadii aad u baahan tahay qaabilaad macquul ah maadaama oo adiga ama ilmahaagu uu qabo laxaad la'aan.**

10,000 • 07/22






*Tilmaamaha Waalidka ee*

# Waxka Qabadka Amaanka Ilmaha

VERMONT
DEPARTMENT FOR CHILDREN & FAMILIES
FAMILY SERVICES DIVISION